IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 3aad | 12 Luuliyo 1975 | L. 1 R. 7

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

EAAFIN BIL SOO BAXA — جريده شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### SHARCI

W. M.

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 29 Dishembre 1974, L. 98 — *Qaadid dhul dan awgeed* Bog 548

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 30 Maarso, 1975, L. 99, — *dhul Doladeed la siiyey gacantana loo geliyey Shariif Maxamed Saalax Bayti* » 549

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 27 Maajo 1975, L. 100, — *Qaadid dhul dan guud awgeed* » 550

XERR WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 22 Juunyo 1975, L. 101, — *Guri lamb. L.H. 2/5 iyo L.H. 2/6 ee waqti hore ay laheeyd Sahra Saalax Axmed* » 551

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 25 Juunyo 1975, L. 102, — *Dhul Dowladeed la siiyey gacntana loo geliyey Jaalle Makay Muudey Cabdi* » 553

Madbacada Dawladda — Muqdisho

XEER WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA, 28.2.1975 L. 103 — *Tariifada Dalalka ku jira Jaamacadda Carabta* Bog. 554

XEER WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA, 5.7.1975, L. 104, — *Tigidh ioog ah* » 556

---

## BOOGA SADDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 5.7.1975, *Naada Dhul Jaalle Luul Cumar Nuur (108* » 557

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 5.7.1975, *Naada Dhul Jaalle Maxamed Guuleed Axmed (109)* » 557

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 5.7.1975, *Naada Ddhul Jaalle Maryan Ciise Cabdi (110)* » 558

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA 30 Juun 1975, *Jeegga lamb. 091.955, So Sh. 10.000 = u leeyahay Cabdillahi Xasna Shirwac (111)* » 559

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA30 Juun 1975, *Jeegga lamb. 13.115, So Sh. 10.011/40 u leeyahay Maxamed Yuusuf Walalac (112)* » 559

*Saxid Qalad (Corregendum)*

# BOGGA LABAAD

# X E E R

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**27 Maajo 1975, L. 98**

**Qaadid dhul dan guud awgeed ee waqti hore la siiyey Jaalle MACALLIN CABDULLE HADAFOW oo ay la wareegtay WAKAALADDA GANACSIGA UMMADDA — ku yaal Muqdisho — Xaafadda Kaaraan.**

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Koowaad ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Settembre 1973;

ISAGA OO ARKAY Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.590 loona tiriyay MACALLIN CABDULLE HADAFOW sida ka muuqata xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegno) taariikhdeeduna ahayd 4 Agosto 1974;

ISAGA OO ARKAY Warqadda lamb. yahay 0582/H/B taariikhduna ahayd 19.8.1973 ee ay noo soo qortay Wakaaladda Ganacsiga Ummadda iyadoo ku weydiisaneysa in la siiyo dhul;

ISAGA OO ARKAY Warqadda qiimaynta derbiga ee uu 18.12.74 soo sameeyey Jeometer ka tirsan Waaxda Qorshaynta iyo Hindisaha, taas oo ayka muuqato qiimaha oo dhan Sh. So. 9.466.45/=;

X E E R

Waxaa la caddeynnyaa in loo qaaday dan guud awgeed darbi uu leeyahay Jaalle MACALLIM CABDULLE HADAFOW, iyadoo loo celinayo magdhaw gaaraya Sh. So. 9.466.45/= sida muujinayso warqadda qiimayntu. Isla markaas waxaa la caddeynayaa in qiimahaas uusan ku jirin kan dhulka. Lacagta maqdhowga waxaa bixinaaya Wakaaladda Ganacsiga Ummadda (E.N.C.).

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka Lamb. 1 bogga lamb 56
Muqdisho, 30 Dic. 1975.
Hantidhawraha Guud
G/Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**30 Maarso 1975, L. 99**

**Dhul Dowladeed lo siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) SHARIIF MAXAMED SAALAX BAYTI — kuna yaal Kismaayo.**

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 50 soono baxya 26 Gennaio 64;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday SHARIIF MAXAMED SAALAX BAYTI, taariikhdeeduna ahaqd 20.4.1974 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Kismaayo;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaan loogu dhajiyay looxa Guddoomiyaha Kisimayo, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda L. 9 soona baxay 1 Sett. 1974, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda ku saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Wasaaradda Hawlaha Guud — Waaxda Farsamada dhulk taariikhdeeduna ahayd 28.10.1974 kuna saabsaneed dhismo Guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 178248 ee 3.11.1974 kana soo baxday Xafiiska Canshruurta Dadban, taas oo caddeyneysa in SHARIIF MAXAMED SAALAX BAYTI uu bixiyay lacag dhan Sh. So.367,50/ kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq.245/ loona tiriyay SHARIIF MAXAMED SAALAX BAYTI sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (vebale di consegna) taariikhdeeduna aheyd 16 DIC. 1974;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynuunka siismada dhulka iyo naqashada tilmaamayso isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Wasaaradda Hawlaha Guug Gobalka Kismaayo, taariikhdeeduna aheyd 20/1/75 taas oo caddaynaysa in naqashada dhismaha oo ay waafaqsan tahay guriga;
ISAGA OO ARKAY 0ggolaanta (Nulla Osta di abitabilita) degganaashada guriga ku dhisan Kismaayo, laguna siiyay Xaashida lamb. 338/XHC/74 ee 2/12/1974 kana soo baxday Xafiiska Caafimaadka Guud Gobalka Kismaayo, taas oo caddaynaysa in guriga wanaagsan yahay,

ISAGA OO AQOONSAN In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismada iyo gacan u gelinta dhulka dowladda

(conessione e coneguente libera disponibilita) oo ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya

XEER

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loona aqoonsaday SHARIIF MAXAMED SAALAX BAYTI, dhul ku fadhiya mq.245/ kuna yaal magaaladda Kisimaayo.

MUQDISHO, 30 MAR. 1975.

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
*W.S. INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diinwaanka Lamb. 1 bogga lamb.6
Muqdisho, 12 APR. 1975.
Hantidhawraha Guud
*W.S. G Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur.*

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**27 Maajo 1975, L. 100**

**Qaadid dhul dan guud awgeed ee hore ay lahayd «ISKAASHATADA RUGTAYDA» lana siiyey MAXAMED IBRAAHIM CABDI — dhul lamb. 10 kuna yaal Muqdisho, Km. 5 Waddada Afgooye.**

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ISAGA OO ARKAY Warqaddii koowaad iyo tii labaad ee kacanka iyo Qaynuunkii koowaad ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeerka Sharciga dhulka lamb. 41 soona baxay 13kii Sett. 1973;

ISAGA OO ARKAY Warqaddii lamb. yahay WHDS/3/1/74/255 taariikhdeeduna ahayd 26.9.1974, ee ay noo soo qortay Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed, iyadoo ku weydiisaneysa in loo qiimeyo darbiga wareegisu oo leeyahay Jaalaha kor kuqoran;

ISAGA OO ARKAY Warqaddii qiimaynta darbiga taariikhdeeduna tahay 10.10.1974 soo sameeyeen Inj. ka tirsan Wakaaladda Hawlaha Guud, taas oo ay ka muuqato qiimaha oo dhan Sh. So. 21.930,50/= (Labatanyiokoowkun iyo naqaal boqolsoddon ee 50/000);
qiimaytii isla markaas waxa lo caddeynayaa in qiimahaas uusan ku jirin kan dhulka.

XEER.

Waxaa la caddeynayaa in loo qaaday dan guud awgeed darbiga oo leeyahay JAALLE MAXAMED IBRAAHIM CABDI, iyadoo loo celinayo maqdhaow gaaraya Sh. So. 21.930,50/= sida muujinayso warqaadda qiimahaas uusan ku jirin kan dhulka.

Lacagtaas kor ku sheegan waxaa maqdhowayaa Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed oo ka mas'uul ah Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud.

Muq. 27/5/1975

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
*w.s.* Inj. *Maxamed Xawaadle Madar*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 17
Muqdisho, 9 Giugno 1975.
Hantidhawraha Guud
*G/Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur*

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**22 Giugno 1975, L. 101**

**Guri lamb. L.H. 2/5 iyo L.H. 2/6 oo waqti hore ay laheeyd SAHRA SAALAX AXMED oo la wareegtay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta — kuna yaa Magaaladda MARKA.**

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ANNAGOO ARGNAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARGNAY Qoraal (Atto) L. 931 Prot. taariikh. 18 Feb. 1973, lagu diiwaan geljyey Marka 16.6.1973 al n. 602 Atti 13 vol. 2/1 oo ah caddeynta Guddomiyaha Degmada MARKA Dhamme Maxamed Jaamac Cali taas oo Fracesco Gallotti oo loo yaqaan (FRANCO) kaga gaday kuna wareejiyey SAHRA SAALAX AXMED wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan gurigaas, kuna yaal magaaladda MARKA;

ANNAGOO ARGNAY Wakaaladda Caamka ah L. 15199 — B.N. — 3609 — 11700 taariikh. tahay 23.12.1974, oo lagu qoray Xafiiska Notaayada Dr. XASAN WARSAME CALI oo Jaalle SAHRA SAALAX AXMED mulkiyada guriga kor ku tilmaman leeyahay uu wakiilatay Jaalle Cumar Cali Saalax inuuku dhaqaaqikaro wax allaale wixii gurigaas ka saabsan oo la jira gadid gurigeeda;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda lamb. yahay WHM/30/224/75 taarikhdeeduna aheyd 18/1/1975 ee ay soo qortay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta oo ay ku weydiisaneyso in loo qiimoyo guriga ay leedahay Jaallaha kor ku magacaaban;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda lamb. yahay WHM/40/200/75 taarikhdeeduna aheyd 10/5/1975 ee ay soo qortay Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta oo ay ku weydiisaneyso in amar xeer loo sameeyo;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda qiimaynta Guriga taarikh. 15/2/1975, soo sameeyeen Injiyeer ka tirsan Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, taas oo ay ka muuqato qiimaha oo dhan Sh.So.112.176,14/

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda qiimeynta Guriga taarikhdeeduna aheyd 6 Abrile 1975 soo sameeyeen Guddigii loo xilsaaray inay dhex dhaxaadiyaan beeca Guriga ay gadanayso Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta Laanta Marka, kana gadanayso Jaalle SAHRA SAALAX AHMED kana wakiil ah Jaalle Cumar Cali Saalim, taas oo ay ka muuqato qiima oo dhan Sh.So.85.000/ (Sideetaniyoshankun);

XEER

Waxaa la caddeynayaa in loo qaaday Dan Guud guriga ay laheeyd SAHRA SAALAX AXMED, iyadoo loo celinayo maydhow gaaraya Sh.So.85.000/ (Sideetaniyoshankun) Shillin, - sida ay muujinayso go,aanka ay gaareen Cuddiga qiimayntu.

Soohinta: Orax Bax waxaa ka jiro Guri uu leyahay Feerri, Orax Dhac waxaa ka jiro guri uu leyahay Gallotti, Koofur waxaa ka jiro Makiinada Nalka Daarta, Qhiblada waxaa ka jiro maqaasin ay leedahay Wasaaradda Hawlaha Guud.

Lacagta maqdhowga waxaa bixinayaa Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta Laanta MARKA.
Muqdisho, 22 Giugno 1975.

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
*W.S. INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR*

XOG.WAS. KALLUUNKA IYO GADIIDKA BADDA
W.S. CISMAAN JAAMAC CALI
WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb.23
Muqdisho, 24 GIU. 1975.
Hantidhawraha Guud

*W.S. G Dhexe Cabdillaahi Warsamo Nuur.*

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

25 Giugno 1975, L. 102
**Dhul Dowladeed la siiyey gocantana loo geliyey (Decreto di concessione e conseguente libera Disponibilità) JAALLE MAKAY MUDDEY CABDI — ku yaal Muqdisho — Degmada SHINGAANI — kuna fadhiya mq. 679,70.**

WASARADDA HAWLAHA GUUD

*Waaxda Dhismaha iyo Dhulka*

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii Labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Ooktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 115 soonabaxay 13.10.1956;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 99 soona baxay 13 Sett. 1956;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensatay MAKAY MUUDEY CABDI taariikhdu markay ahyed 7 Feb. 1958, kuna weydiisaaty dhismo cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Degmada Shingaani — ex via Talmone, kuna dhacaaya qaybta I°;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaan loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 7 ee 1.7.1959, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda L. 13.700, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 248°aad taariikhduna ahayd 16 Dic. 59;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda L. 8898 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 13.700 laguna aqoonsaday fadhigii 259°aad ee Guddiga Dhismaha Dowladda Hoose, taariikhdu markay ahayed 19 Sett. 1960, kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 10591 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 8898 laguna aqoonsaday fadhigii 354° aad ee Guddiga Dhismaha Dowladda Hoose, taariikhdu markay ahyad 20 Luglio 1965, kuna saabsaneed dhismo Guri kuna fadhiya mq. 679,70;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada L. 1853 ee 12.4.1960 iyo Bolleetada L. 3289 ee 20.6.1960, kana soo baxday Xaafiiska Canshuuraha Dadban, lambarkeeduna ahayd 1025812 taariikhdeeduna ahayd 21.6.1960 taas oo caddeynaysa in MAKAY MUDDEY CABDI bixisay lacag dhan Sh. So 8.156,40/= kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO ARKAY Dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 679,70 loona tiriyay MAKAY MUDDEY CABDI sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada Dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 19 Gen. 1961;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijinta Farsamada ka tirsan Waaxda

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta abitabilita') daggana-Dhismaha iyo Dhulka,taariikhdeeduna aheyd 22.6.1975 taas oo caddeyneysa in Naqshadda Dhismaha oo y oggolaadeen Guddiga Dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar lamb. 10591 ee 7.7.1965 laguna xaqiijiyay sida ay naqshadd Guriga waafaqsan tahay;

naashada Guriga ku dhisan Xamar Degmada Shingaani — Via Talmoone laguna siiyay xaashida lamb. 12738 ee 15 Nov. 1965 oo Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY In la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhismahaas ku yaal dhulkaas, Dowladda (Concessione conseguente libera disponibilità) oo ay ujeeddadiisu aheyd dihs, wuxuu soo saaraya.

XEER

Waxaa dhul Dowladeed la siiyey, gacantana loo geliyey, loona aqoonday MAKAY MUDDEY CADBI dhul ku fadhiya mq. 679,70 kuna yaal Muqdisho — Degmada Shingaani — Via Talmooe.
Muq. 25/6/1975.

XOGHAYAHA
WASAARADDA HAWAHA GUUD
*w. s* Inj. *Maxamed Xawaadle Madar*

WAAN ARKAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 24
Muqdisho, 5 Luuliyo 1975.
Hantidhawraha Guud
*D/Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur*

---

Xeer WASAARADDA BOOSTADA iyo ISGAARSIINTA
**28 Febraayo 1975 L.103**
**Taraafada Dalalka ku jira Jaamacadda Carabta.**

## WASAARADDA BOOSTADA iyo ISGAARSIINTA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISGOO ARKAY Qodobka 21aad ee Sharciga Boostada L,R. 662-soo baxay 22/9/1971;

ISAGOO ARKAY Degreetada Wasaradda L.R. 287 ee 12/12/71-oo Tariifada Boostadu ay ku soo baxday;

ISAGOO ARKAY Sharciga Convention Ururka Boostada ee-Jamacadda Carabta;

ISAGOO TIXGELINAYA Inay lagama maarmaan tahay in loo

sameeyo Tariifo Booseed oo u gaar ah Dalalka ku jira Jaamacadda Carabta;

ISAGOO LA TASHANAYA Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Maalinyadda;

WUXUU XEERAYAA

Qodob 1aad

*Tariifada Boostada Caadiga ah*

Tariifada Boostada caadiga ah (surface mail) ee dalalka ku jira Jaamacadda Carabta waxa lagu hirgelinaya ama lagu dabaqaya tariifada dalka gudihiisa u degsan.

Qodob 2aad

*Tariifada Boostada Tubta Cirka*

Tariifada Boostada ee tubta cirka waxay ka koobantaa tariifada ku xusan Qodobka 1 aad iyo qiimaha dheeraadka ah (air surcharge) ee hoos ku qoran.

a) Warqadaha (L.C.) 10kii grammeba Sh.So. 0,25;
b) Alaabt kale (O.A) 30kii grammeba Sh. So. 0,30

Qodob 3aad

*Tariifada Guntimaha*

Tariifada Guntimaha Boostada waxay noqoneysa sida uu jideynayo Sharciga (Convention) ee u degsan Ururka Boostada Jaamacadda Carabta.

Qodob 4aad
Dhaqan Gelin

Xerkani wuxuu dhaqan gelaya 1da Maarso 1975.

Qodob 5aad
Burin

Tariifa kasta oo Xeerkan khilaafsan waa la buriyey.

*(Dott. Cabdullahi Cosoble Siyaad)*
XOGHAYAHA DAWLADDA
WASAARADDA BOOSTADA iyo ISGAARSIINTA

*(Dott. Cabdiraxmaan Nuur Xersi)*
XOGHAYAHA DAWLADDA
WASAARADDA MAALIYADDA

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY
Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 98
Muqdisho, 5 Luuliyo 1975
Hantidhawrka Guud
G/Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur

**Xeer WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA**

**Muqdisho 5 LUG 1975 L. 104**
**TIGIDH JOOGTA AH.**

WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA

ISAGOO ARKAY Xashida 1aad iyo tan 2aad Kacaanka.

ISAGOO ARKAY Qodobka 22aad iyo 23aad ee Sharciga Boostada Lr. 62 Soona Baxay 22.9.1971.

ISAGOO DHEGEYSTAY Talada Guddiga Filateliga.

ISAGOO TIXGELINAY Baahid loo qabo in la soo saaro Tigidho 6qiime ah oo kuwo Joogto ah laguna magacabay Huga Dhaqanka (Traditional Costume)

WUXUU GUDDOOMINAYA

Qodob. 1aad

In la soo saaro tigidh Joogtta ah laguna magacabay Huga Dhaqanka qiimahooduna iyo tirada la soo dabacayna yihiin:-

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Sh. So. | 0,10 | Tirada la dabacay | 1.000.000 | (Hal Million) |
| Sh. So. | 0,40 | » | » | » |
| Sh. So. | 0,50 | » | » | » |
| Sh. So. | 1,00 | » | » | » |
| Sh. So. | 5.00 | » | » | » |
| Sh .So. | 10,00 | » | » | » |

Tigidhadaas waxaa lagu dabacay ISTITUTO POLIGRAFICO DELLA STATO ROMA, Waxaana lagu sameeyey xaashiyo aan ahayn Filigranata, qiyaastooduna ama cabirkooduna waxaa weeye 26 × 31.

Qodob. 2aad

Tigidhadaas oo joogta ah waxaay soo bixi doonan 5.7.1975.

*Jaalle Cadbillahi Cosoble Siyaad*
XOGHAYAHA DAWLADDA.

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

Diiwaanka lamb. 1 bogga lamb. 97
Muqdisho 5 Luuliyo 1975
Hantidhawrka Guud
[illegible]

# BOOGA SADDEXAAD

## TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle luul cumar Nuur, u u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu A. 17/6/75 uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl - Wadaag, oo leh qiyaas afar gees siman 27 × 27 kuna fadhiya 729/mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.
Koofur waxaa ka xiga: Waddo.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.
Bari waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Luuliyo 1975.

*Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka*
*Maxamed Cabdi Saciid*

---

### N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Maxamed Guuleed Axmed, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka taariikhdu markay ahayd 9/6/75 uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyaas regtangolaar 27 × 13,50 kuna fadhiya 364,50/ mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed iyo Suuq.
Koofur waxaa ka xiga: Waddada Ummadda.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.
Bari waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30(soddon maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Luuliyo 1975

*Maamuulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka*
*Maxamed Cabdi Saciid*

## NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle MARYAN CIISE CABDI, usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 9.9.74 uu ku weydiisanayey dhul dowladeed kuna yaad Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas raktangolar ah 30 × 20 kuna fadhiya 600 mdh.

Sohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul lamb. 51.
Koofur waxaa ka xigga : Jid.
Galbeed waxaa ka xigga : Dhul lamb. 43.
Bari waxaa ka xigga : Dhul lamb. 44.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiisan uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood ee laga bilaabo maantii lugu naadshey kuuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 5 Luuliyo 1975.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(110)* *Maxamed Cabdi Ciise*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

**DEKRETO LAMB. 19 75, CABDULLAHI XASAN SHIRWAC ARJILEH iyo BANKIGA GANACSIGA SOOMAALIYEED.**

## DEKRETO AMAR

Labada Magac oo kor ku qoran waxay hor keenen Maxkamadda sida hoos ku qoran;

1. Cabdillahi Xasan Shirwac wuxuu Maxkamadda hor keenay arji u ku dalbanayo in Jeegga wareega ah Lamb. yahay 091.955 T/ahayd 1dii Disember 1974 kuna taalo lacag dhan So.Sh.10.000/00 (toban kun oo shillin.

2. Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta, Hargeysa isaguna Maxkamadda wuxuu keenay Taar. markay ahayd 18/6/75 warqadda Lamb. yahay 003.983 taas oo u ku cadeeyey in lumay Jeegga Lamb. yahay kan kor ku qoran anay joojiyey bixinta lacagta ku tiiley Jeegga. Sidaas darteed Markii aan Arkay waxyaalaha kor ku qoran iyo Markii aan Arkay Qod.27 Xeerka Lamb. yahay 2 soona baxay 9/9/65 iyo Qod. Lamb. yahay 69 oo isla Xeerkaas.

1. Waxa la Amray in uusan socon karin Jeegga Lamb. yahay kan kor ku qoran laga bilaabo maanta

2. In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.

3. In lacagta ah So. Sh. 10.000/00 (Toban kun oo shillin) Bankigu siiyo Arjilaha Magaciisu kor ku qoran yahay shan iyo Toban Casho (15) ka dib marka lagu qoro Faafinta Ras. ah. 30kii Juun 1975.

GUDDOOMIYAHA
MAKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA
(111) *(XASAN XAAJI YUUSUF)*

---

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

**DEKRETO L. 18 75 Maxamed Yuusuf Walalac Arjileh iyo Bankiga Ganacsiga Ummadda Hargeysa Dood Geliye**

DEKRETO AMAR

Labada Magac ee kor ku qoran woxay hor keenen Maxkamadda sida hoos ku qoran; Maxamed Yuusuf Walalac wuxuu Maxkammadda hor keenay Arji u ku dalbanayo in Jeegga Wareegga Lamb. yahay 13.115 lacagtiisu tahay 10.011/40 (toban kun iyo kow iyo toban shillin iyo afartan Santi) Taar. ahayd 11.5.75 ku lumay. Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta, Hargeysa isaguna Maxkamadda wuxuu keenay warqad Lamb. 4085 Taar. 23/6/75 u ku caddeynayo in u lumay Jeegga Lamb. yahay kan kor ku qoran, anay joojiyeen bixinta lacagta ku tiilay Jeegga. Sidaa markii aan arkay waxyaalaha kor ku qoran iyo markii aan arkay Qod.27 Xeerka Lamb. yahay 2soona baxay 9/9/65 iyo Qod. Lamb. yahay 69 oo isla Xeerka waxa la Amray;

1. In uusan socon karin Jeegga lamb. yahay kan kor ku qoran.

2. In lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.

3. In lacagtaas ah So. Sh. 10.011/40 (toban kun shillin iyo toban shallin iyo afartan santi) aBnkiga siiyo Arjilaha magaciicu kor ku qoran yahay shan iyo toban casho (15) casho ka dib marka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 30 Juun 1975.

GUDDOOMIYAHA
MAKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA
(112) *(Xasan Xaaji Yuusuf)*

## SAXID QALAD

1. Faafinta Rasmiga ah ee Labmarkeedu yahay 1 R 2 ee soo bax-day 10 Febbrayo 1975, waxaa taariikhda u soo baxay loo akhriyi doona 13 Febbrayo 1975 meesha ahayd 10 Febbrayo 1975.

2. Sharciga lamb. 14 ee 13 Febbrayo oo ay ujeeddadiisu ahayd SHARCI CASHUUR KA DHAAFID laguna qoray Faafinta Rasmiga ah L. 1 R. 2 ee soo baxay 13 Febbrayo 1975 waxaa lambar ahaan loo akhri-yi doonaa 13/bis.